

Isbuuclaha BSD - Maarso 22, 2021

Xulashada Noocyada Waxbarista Kala-Duwan - Isku-Dhafka ama CDL

Instructional Model	PA	PP	KF	01	02	03	04	05	06	07	08	09	10	11	12	Total
No Choice	1 1.03%	1 0.82%	1 0.30%	1 0.26%	4 0.15%	1 0.25%	5 0.19%	5 0.18%								32 0.10%
CDL	46 47.42%	41 33.61%	1086 45.94%	1320 48.85%	1336 50.40%	1312 47.71%	1282 48.40%	1246 44.25%	1191 40.22%	1312 44.04%	1391 46.71%	1398 44.11%	1550 48.94%	1545 52.34%	1474 51.77%	17530 47.12%
IPH	50 51.55%	80 65.57%	1271 53.76%	1375 50.89%	1311 49.45%	1431 52.04%	1362 51.42%	1565 55.58%	1770 59.78%	1667 55.96%	1587 53.29%	1771 55.89%	1617 51.06%	1407 47.66%	1373 48.23%	19637 52.78%
Total	92	122	2364	2702	2651	2750	2649	2816	2961	2972	2978	3169	3167	2952	2847	37204

Qoysaskeena oo dhama waxay hada dhameeyeen xulashada ardaydooda - Hybrid ama CDL. Waa tan sida u qeybsan tahay heerka fasal. (CDL waxaa loola jeedaa Barashada Fogaanta Dheeriga ah; IPH macnaheedu waa Waxbarista Isku-dahfan ee Shakhsiyeed. Ma doorran waa in ardayda cusub uu soo galayo degmadeena ee aan weli go'aan gaarin.)

Haddii aad jeclaan lahayd inaad si fog u dhex gasho oo aad u fiirsiso lambarada iskuulkaaga gaarka ah, kaalay oo booqo [Return to In-Person Instruction website](#).

Whitford Futurecade

Macalinka teknolojiyada Whitford Tyler Smith wuxuu ardayda kala shaqeynayay sidii ay u sameyn lahaayeen ciyaaro fiidiyow ah oo u gaar ah. Ardaydu waxay adeegsanayeen bogg loo yaqaan MakeCode Arcade si ay u sameyeyaan astaamo asal ah oo leh ujeedooyin u gaar ah. Fiirsi sida afar arday oo ka tirsan Whitford ay usoo gudbiyeen fiidiyowgooda ciyaarta, habka iyo sababta fasalku u noqday mid aad u xiiso badan. <https://youtu.be/0uixkse6DEY>

Macluumaadka Adeegyada Nafaqada ee Guga

Bilawga Waxbarista Isku-dhafan ee Qofeed waa mid dhaw, isla markaana Waaxdeenna Adeegyada Nafaqada aad bey uga shaqeysay samaynta qorshe ku saabsan sida loo sii wado bixinta cuntada bilaashka ah ee carruurta oo dhan inta lagu jiro barashada isku-dhafan iyo mida khadka ah. USDA waxay bixisay cafis inta sanad dugsiyeedka ka harsan taas oo u ogolaaneysa cunug kasta oo jiro (da'da 1-18) inuu helo cunto bilaash ah.

Laga bilaabo Abriil 5, adeegga cuntada ee qadadka basaska waa la joojin doonaa.

Muddada isku dhafka, adeegga cuntada ee soo socda ayaa la heli doonaa. Diiwaan gelin looma baahna.

Ardayda dugsiga hoose

- Ardayda isku dhafka waxay heli karaan bac cunto bilaash ah oo quraac, qado iyo cunto fudud ah si ay guryahooda ugu qaataan.
- Laba maalmood oo cunto ah ayaa loo diri doonaa guriga maalinta Talaadada.

Ardayda dugsiga dhexe

- Ardayda isku dhafka waxay si bilaash ah ugu cuni karaan iskuulka qado maalmaha ay ka qeyb galaan waxbarida shaqsi ahaaneed.
- Boorsooyinka cuntada bilaashka ah oo ay ku jiraan quraac, qado iyo casho fudud ayaa loo heli doonaa ardayda inay guryahooda u qaataan dhamaadka maalmaha waxbarista shaqsiyeed si ay u isticmaalaan maalmaha ay ka baranayaan guriga.

Ardayda dugsiyada sare iyo khiyaariga

- Ardayda isku dhafka waxay si bilaash ah ugu cuni karaan iskuulka quraac iyo qado maalmaha ay ka qeyb galaan waxbarida shaqsi ahaaneed.
- Boorsooyinka cuntada bilaashka ah oo ay ku jiraan quraac, qado iyo casho fudud ayaa loo heli doonaa ardayda inay guryahooda u qaataan dhamaadka maalmaha waxbarista shaqsiyeed si ay u isticmaalaan maalmaha ay ka baranayaan guriga.

Ardayda CDL iyo FLEX Online

- Dhammaan ardayda Waxbarista Fog ee Dhameystiran (CDL), ardayda FLEX iyo carruurta aan ka diiwaangashanayn Dugsiga Degmadda Beaverton waxay heli karaan boorso cunto ah ee 5-maalmood oo bilaash ah Arbacada kasta laga bilaabo 11-da - 12 - 12 p.m.
- Bacaha cuntada waxaa ka mid ah 5 quraac, 5 qado iyo 5 cunto fudud. Carruurta da'doodu tahay 4 oo kaliya iyo wixii ka weyn ayaa xaq u leh casho fudud.
- Qoysasku waxay dooran karaan iskuul ay ka soo qaataan cuntooyinkan ee [Meal Bag Registration Form](#).
- Isdiiwaangelinta ayaa si adag loo dhiirrigelinayaa.
- Muhiim maaha Carruurta inay yimaadaan si ay u soo qaataan boorsooyinka cuntada.
- Qof kasta oo qaadaya bacaha cuntada waa inuu xirto maaskaro.

Si aad isaga diiwaangeliso bacaha cuntada ee 5-ta maalmood iyo macluumaadka ugu dambeeyay, fadlan booqo: www.beaverton.k12.or.us/meals

Waxaa Jirto Balanta Dharka Caruurta

Haddii ardaygaagu u baahan yahay dhar bilaash ah, Dharka Carruurta ayaa diyaar u ah inay kuu adeegaan. Balan ayaa loo baahan yahay. Saacadaha shaqada ee Dharka

carruurta: Talaado 9:30 a.m. - 3 pm, Arbacada 10 a.m. - 6 p.m. iyo Khamiista 9:30 a.m. - 3 pm.

Si jadwal loo sameeyo, fadlan buuxi [Clothes for Kids Appointment form](#) ama wac 503-356-4322. Booqashooyinka ayaa ku kooban hal qof oo weyn oo leh afar carruur ah ama laba qof oo waaweyn oo leh 8 carruur ah. Dhammaan dadka soo booqanaya waa inay xirtaan maaskarada. Haddii aadan lahayn mid kuu gaar ah, mid waan ku siin doonnaa.

Waxaan sidoo kale raadineynaa mutadawiciin Dhar Carruurta. Fadlan la xiriir Johanna Shrout johanna_shrout@beaverton.k12.or.us.

Wargelinta Daawadayaasha Ciyaaraha

Ururka Waxqabadka Iskuulada ee Oregon (OSAA) wuxuu dib u habeyn ku sameeyay tilmaamaha daawadayaasha xafladaha ciyaaraha fudud:

- Tirada daawadayaasha istaandarka garoonka ayaa haatan loo arkaa mid ka duwan tirada ciyaartoyda, madaxda kooxda iyo tababarayaasha garoonka ku jira.
- Daawadayaashu waa inay kujiraan aagag loo qoondeeyey oo leh meelo gelid, bixitaanno iyo musqulo ka gooni ah kaqeybgalayaasha cayaaraha. Meelahaas waa inay lix cagood ugu yaraan u jiraan howlaha isboortiga.
- Shuruudaha daboolashada wajiga waajibka ah ayaa wali shaqeynaya.

Tani maxay uga dhigan tahay BSD?

- Dugsi sare kasta wuxuu hada fiiriyaa xarun isboorti kasta si uu u arko inta irridood iyo musqulood ay leedahay (oo ay ku jiraan musqulaha la qaadan karo) ee ay isticmaali karaan kooxo kala duwan - tusaale ahaan: daawadayaasha, ciyaartoyda garoonka iyo tababarayaasha, hogaamiyeyaasha iyo xubnaha kooxda. Ogolaanshaha ayaa ku kala duwanaan doona goobta iyo isboortiga.
- Waqtigaan, daawadayaal imaanaya lama oggolaan doono, haddii aysan si kale u qeexin dugsiyada sare.
- Dugsiyada sare ayaa talaabadan u qaadaya midba mar. In kasta oo daawadayaasha ardayda (marka laga reebo walaalaha ciyaartoyda) aan wali la oggolaan, waxaan raadineynaa qaabab aan ugu fureyno tartamada isboortiga daawadayaasha ardayda.

Dugsiyada sare waxay maalmaha soo socda la socodsiiin doonaan bulshadooda qorshooyin gaar ah. Waxaan rajeyneynaa inaan kugu aragno taribuunka!

Bisha Muusikada ee Dugsiyadeena: Stephanie Palmer

Sannadkan, Bisha Muusiga ee Dugsiyadeena wuxuu diiradda saarayaa faa'iidooyinka bulsho-shucuureed ee muusiggu u leeyahay ardayda. Baro sida hal macalin oo muusig ah uu hal-abuur ugu sameeyay xirmooyinka muusikada ee guriga si ardaydeeda loogu mashquuliyo inta lagu jiro Barashada Fogaanta Dheeriga ah. <https://youtu.be/bNOlrIDoKyk>

Dib-Ugu-Noqoshada Dugsiga 2021 - Qorshee Safarkaaga

Inagoo isu diyaarinayno ku noqoshada waxbarida shakhsi ahaaneed, Wadooyinka Badbaadada ee Beaverton ee Dugsiga ayaa kugu martiqaadaya inaad ogaato xulashooyinkaaga safarka nabadgelyo ee dugsiga ee websaydhkeena. Waxaan bixinay talooyin amniga ah iyo kuwo jidadka socodka, lagu ordo, iyo kuwo baska lagu raaco. Intaa waxaa sii dheer, waxaad ka heli doontaa khariidadaha imaanshaha iyo bixitaanka ee dugsi kasta oo hoose. Khariidadahaani waxay tilmaamayaan sida ardayda ku safraya lug, bas iyo gaari ay tahay inay ku yimaadaan oo uga baxaan xarumaha dugsiyadeena. Amniga ardaydayadu adiga ayey kuxirantahay! Si aad waxbadan uga barato booqa www.beaverton.k12.or.us/safe-routes